**IIB MA GALO**

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho, 1da Maarso 1978 — L. 3

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 6 ee 24 Feb. 78, Heshiis Amaah ah ee dhexmaray Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed iyo Bangiga Horumarinta Aljeeriya. » 117

قانـــون رقم ٦ تاريخ ٢٤ — ٢ —١٩٧٨م ١١٨

تصديق على اتفاقية القرض بين بنك التنمية الصومالى وبـــين بنـــك التنمية الجزائرى .

SHARCI L. 7 ee 24 Feb. 78. Ku dhawaaqidda Marxalad heegan ah. » 119

SHARCI L. 8 ee 24 Feb. 78, Xilka iyo awoodda La-Taliyaha Madaxweynaha Xagga Arrimaha Dhaqaalaha. » 121

... L. 9 ... 4 Maarso 78. Oggolaansho xubin ka

LAW N. 9 of 4th March 1978 the acceptance of the Somali Democratic Republic to the I.M.C.O. Convention. » 124

## QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 10 ee 31 Jennaayo 78, Kirada Cusub ee Baabuurta Xamuulka. » 125

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 11 ee 24 Febraayo 78, Magacaabid La-Taliyaha Madaxweynaha Xagga Dhaqaalaha. » 127

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 12 ee 15 Abriile 78, Concessione di area di terreno demaniale a favore del Sig. Ali Scek Haidar. » 128

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 13 ee 16 Luulyo 77, Qaadid dhul Dan Guud aawgeed ee waqti hore la siiyey Jaalle Bilan Samantar Warfaa. » 129

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 14 ee 15 Feb. 78, Dhul Dawladeed la siiyey, sharci ahana loo aqoonsaday Jaalle Maxamed Nuureeni Bakarkuna fadhiya mq. 697,50. » 130

## QAYBTA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, **13.2.78, lumid** Buugga L. 10496 kuna qoran tahay Sh. So. 3.683, uu leeyahay Ciise Faarax Maxamed L. 100. » 132

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 26.2.78, lumid Jeegaga Kaydka ee kala yihiin 010690./ iyo 01691/- oo ay ku qoran tahay kiiba 1.000./ isu geyn 2.000/- uu leeyahay Maxamed Abyan Cigaal L. 101

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 26.2.78, lumid Jeegga Kaydka ee lam. yahay 211318; ee ay ku qoran tahay Shs. 3.000/- uu leeyahay Cabdullaahi Maxamuud Guuleed L. 102 » 133

MAXKAMADDA GOBOLKA BAYDHABO. 27.2.78 lumid Jeegga L. 17352 ku qoran tahay Shs. 540 uu leeyahay Xaaji Siid Bakar L. 103

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 27.2.78 lumid Jeegga lam. 17352 ku qoran tahay Shs. 540/- uu leeyahay Maxamed Cabdulle Cali L. 104 » 134

SOCIEA' INCREMENTO PRODUZIONALE AGRICOLA - S.I.P.A. Ogeysiis isu yeerid Shir caadi ah L. 105 » 135

SOCIETA' INDUSTRIALE COMMERCIALE ARMATORIALE. Ogeysiis isugu yeedir Shir Caadi - ah L. 106

S.I.C.A. (F. BOERO) - S.p.A

SOCIETA' INDUSTRIALE COMMERCIALE, Avviso di Convocazione di Assemblea Ordinaria L. 106 » 136

MAXKAMADDA DEGMADA BERBERA, 31.1.78, lumid Buugga Kaydka L. 1391/7 ku qoran tahay Shs. 10.45 uu leeyahay Ibraahim Cabdi Cawaale L. 107 » 137

Raashan istaahil

## QAYBTA KOOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 6 ee 78, Heshiis Amaah ah ee dhex maray Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed iyo Bangiga Hormarinta Aljeeriya.

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYEED

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada tirsigoodu yahay 1, 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1dii Luuliyo, 1976.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed, isagoo ka wakiil ah Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, iyo Bangiga Horumarinta Aljeeriya, isagoo ka wakiil ah Jamhuuriyada Dimoqraadiga Dadka ee Aljeeriya, laguna kala saxeexday Aljeeris 13kii Sebtember, 1977.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada ee 10kii Jannaayo 1978.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed iyo Bangiga Horumarinta Aljeeriya, lana saxeexay 13kii Sebtembar,, 1977, waa la meelmariyey.

Qadobka 2aad

Heshiiskani wuxuu ku leeyahay Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, wuxuuna dhaqan galay 10kii Jannaayo 1978.

Sharcigan waxa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho 24.Feberaayo 1978.

MADAXWAYNAHA J.D.S.

S/G/ Jaalle Maxamed Siyaad Barre

قانون رقم ٦ تاريخ ٢٤ — ٢ — ١٩٧٨م.
تصدق على اتفاقية القرض بين بنك التنمية الصومالى وبين بنك التنمية الجزائرى .

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

بعد الاطلاع : على الميثاق الاول والثانى والثالث لثورة ٢١ أكتوبر ١٩٦٩م.
وبعد الاطلاع : على القوانين رقم ١، ١٧ ، ١٨، ١٩، الصادر فى ١ يوليو ١٩٧٦م .

وبعد الاطلاع : على اتفاقية القرض بين بنك التنمية الصومالى بوصفه ممثلا لجمهورية الصومال الديمقراطية وبين بنك التنمية الجزائرى

بوصفه ممثلا لجمهورية الجزائر الديمقراطية الشعبية والواقع عليها فى الجزائر بتاريخ ١٣ — ٩ — ١٩٧٧م.

وبعد الاطلاع: على موافقة اللجنة السياسية ومجلس الوزراء فى ١٠ يناير ١٩٧٨م.

**يصـــدر المرسوم التالى :**

المـــادة : ١

تم التصديق على اتفاقية قرض بين بنك التنمية الصومالى وبنك التنمية الجزائرى فى ١٠ يناير ١٩٧٨م.

المـــادة : ٢

للاتفاقية قوة القانون فى جمهورية الصومال الديمقراطيـــة من يـــوم التصديق عليها فى ١٠ يناير ١٩٧٨م.

مقديشو، فى ٢٤ — ٢ — ١٩٧٨م.

اللواء

**محمد سياد برى**

SHARCI L. 7 ee 24 Feb. 78, ku dhawaaqid Marxalad Heegan ah.
(Proclamation of State of Emergency)

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida Koowaad, tan Labaad iyo tan Saddexaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 70aad ee Sharciga Lambarkiisu yahay 21 ee soo baxay 26-8-1963;

ISAGOO ARKAY: Inay tahay lagama maarmaan in dalka iyo dadka Soomaaliyeed ay galaan marxalad heegan ah sababtoo ah waxaa caddaatay in dawlado Ajnebi ahi ay soo fara geliyeen arrimaha Geeska Afrika oo gaar u ah Afrika, ayagoo is-bahaystay, taageerana siinayaan cadowga Ummadda Soomaaliyeed oo weerar is-dabajoog ah, xagga Dhulka iyo Cirkaba, ku soo qaadayaan dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeedba, waxayna ku kalliftay J.D.S. inay weerarka tooska ah iska daafacdo, taageerada Gobannimadoonka ay siin jireena sii kordhiso.

ISAGOO TIXGILINAYA: Go,aankii ka soo baxay Golaha Dhexe ee X.H.K.S.Shirkiisii aan caadiga ahayn oo uu yeeshay 8-9 Febaraayo 1978;

WUXUU SOO SAARAAYAA
SHARCIGA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Waxaa lagu amrayaa in dalka iyo dadka Soomaaliyeed ay galaan marxalad heegan ah (State of Emergency) si ay xooggooda meel isugu geeyaan, daafacaanna midnimada iyo jiritaanka Qaranka Soomaaliyeed.

Qodbka 2aad

1. Qof kasta oo Soomaali ah waa inuu isku tiriyaa inuu xubin ka yahay xoogagga daafaca dalka, kicinta iyo abaabulka dadweynaha Soomaaliyeed.

2. Waajibka difaaca wuxuu dareensiinayaa inay dadweynuhu mutadawiciin noqdaan oo ay tagaan iskuna qoraan Xarumaha gaarka ah oo ay abaabushay Wasaaradda Gaashaandhigga.

Qodobka 3aad

Qof kasta oo horey Ciidammada Qalabka Sida uga tirsanaan jiray waa inuu si degdeg ah ula xiriiraa Wasaaradda Gaashaandhigga.

Qodobka 4aad

Shagaalaha, Dadweynaha iyo maamulka ...

Qodobka 5aad

Qof kasta oo diida waajibaadka waddaniga ah oo ku saabsan daafacaadda Dalka, wuxuu muteysanayaa ciqaab xarig ah oo gaaraya 10 ilaa 15 sano iyo ganaax dhan Shs. So. 15.000/=. Haddii uu qofkaasi galo dembi ka weyn fulin waaga waajibaadka sharcigani farayo, waxa lala tiigsan doonaa sharciyada Mileteriga ee waqtiga dagaalka.

Qodbka 6aad

Sharcigan waxa awooddiisa leh Maxkamadda Badbaadada Dalka.

Qodobka 7aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 10ka Febraayo, 1978. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4 Maarso 1978.

(JAALE MAXAMED SIYAAD BARRE)

MADAXWAYNAHA J.D.S.

SHARCI L. 8 — Xilka iyo Awoodda La-Taliyaha Madaxweynaha Xagga Arrimaha Dhaqaalaha.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada kala ah 1, 17, 18 iyo 19 ee soo baxeen 1da Luulyo 1976.

ISAGOO ARKAY : Sharciga L. yahay 71 ee 12 Nofember 1977 ee lagu dhisay jagada La-Taliyaha Xagga Dhaqaalaha ee Madaxwaynaha J.D.S.

ISAGOO ARKAY :Go,aankii Gudiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada taariikhdiisuna ahayd 2.2.1978.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Xilka iyo Awooda Xafiiska La-Taliyaha

Dhaqaalaha ee Madaxwynaha J.D.S.

1) Xafiiska Hawshiisu waxay tahay inuu MadaxwaynahaJ.D.S. mas,uul uga ahaado la sacodka iyo kor ka ilaalinta hawlaha la xiriira dhaqaalaha Qaranka iyadoo waajibaadka loo xilsaaray ay ka mid yihiin:-

a) Habaynta, iskuduwidda, xaqiijinta iyo haybsashada fulinta Siyaasadda Guud ee Dhaqaalaha:

b) Fiiro gaar ah u lahaanshaha iyo tala ka bixinta sidii maalgilin dhaqaalaha loogu horumarsho loo heli lahaa:

t) Iskuduwidda iyo dhaxdhaxaadinta tillaabooyinka xubnaha dhaqaaluhu qaadayaan ee kala duwan, si ay iskaga hor imanin iyada oo lawaafajinayo siyaasadda guud ee horumarka dhaqaalaha.

j) Iskuduwidda guud iyo la socodka xiriirka dhaqaalaha ee hay,adaha kala duwan la leeyihiin dibadda iyada oo aan laga tilaabsanayn calaaqaadka gaarka ah ee Hay,adahaasi la leeyihiin xubnaha Dawladda .

2) Waxaa kale ee xafiiskaasi awood buuxda la leeyahay inuu:

a) Meeshii socodsiinta hawsha dhaliili ka muuqato iyo hirgelinta siyaasadda dhaqaalaha uu isku taxalujinayo toosinteeda

b) Arrimaha Wasaaradaha ama Hay'adaha dhaqaalaha dhexmara dhexgalkooda iyo xallintooda.

t ) Fiiro joogto ah u lahaado heerka dhaqaalaha dalku marayo. tallaabooyinna ka qaado habda sidii loo hagaajin lahaa, horayna loogu dhigi lahaa.

j ) Markasta talo iyo warbixin ka siiyo Madaxweynaha J.D.S. hawlaha la xiriira dhaqaalaha, Maaliyadda iyo xaalada guud ee Dhaqaalaha Dalka.

x) Darsi iyo baarid sugan ku sameeyo sharciyadda la xiriira dhaqaalaha ka hor intaan Golayaasha la horgeynin, si looga gaashaanto dhibaatooyinka lama filaanka ah ee dhaqaalaha hakin kara.

kh) qabto hawlihii kale ee uu Madaxwaynuhu u xilsaaro.

Qodobka 2aad

Hay'adaha ku shaqo leh dhaqaalaha waxaa waajib ku ah si Xafiiska lagu tilmaamay qod. 1aad ee sharcigan uu u guto hawshiisa inay la socodsiiyaan waxay qabanayaan, ogeysiisna siiyaan wixii ay qorayaan ee la xiriira socodsiinta dhaqaalaha iyaga oo dhaqsana war tifaftiran ka siinaya Xafiiska uu ka soo warsado, deg-degna u fuliyaan awaamirta ka soo baxda.

Qodobka 3aad

La-Taliyaha Madaxweynaha Xagga Dhaqaalaha wuxuu Xubin ka noqonayaa Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa kaddib marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Qodobka 5aad

Waxaa la baabi'iyay sharci kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Muqdisho 24 Feb. 1978.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 9 ee 4 Maarso 1978, oggolaansho Xubin ka noqosho J.D.S. Axdiga Ururka I.M.C.O.

MADAXWAYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQ. SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad, iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada tirsigoodu yahay 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luulyo, 1976.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 6aad iyo 57aad ee Axdigan.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Baahida loo qabo xubin ka mid noqosha Axdiga Ururka I.M.C.O. ee lagu saxeexay Jineefa, 6dii Maarso, 1948.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada ee 23kii Febraayo, 1978.

Wuxuu soo saarayaa sharcigan soo socda:-

Qodobka 1aad

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya way oggolaatay inay xubin ka noqoto Axdiga Ururka I.M.C.O. ee lagu saxeexay Jineefa, 6dii Maarso, 1948.

Qodobka 2aad

Axdigani wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, sida waafaqsan qodobka 60aad ee Axdigan.

Waxa lagu soo saari doonaa sharcigan Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho 4 Maarso 1978.

Madaxweynaha

Jamhuuriyadda Dimoq. Soomaaliya

Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre

LAW N. 9 of 4th March 1978 the acceptance of the Somali Democratic Republic to the I.M.C.O Convention.

THE PRESIDENT

OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

HAVING SEEN : The 1st, 2nd, and 3rd, Charters of October 21st. Revolution 1969 .

HAVING SEEN : Law No. 1, 17, 18 and 19 of 1st. July 1976

HAVING SEEN : Articles 6 and 57 of the foresaid Convention.

CONSIDERING : The necessity to accept the Convention on Inter-Governmental Maritime Consultative Organization, done in Geneva on 6th March, 1948.

TAKING NOTE : Of the Approval of the Political Bureau and the Council of Ministers on 23rd, February, 1978.

Hereby promulgates the following law :

Article I

The Somali Democratic Republic hereby accepts the Convention on the Inter-Governmental Marittime Consultative Organization done in Geneva on 6th March, 1948.

Art.II

The Convention shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic in accordance with Article 60 of the Convention.

This law shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, 4th March 1978.

Major GENERAL MOHAMED SIAD BARRE

PRESIDENT

OF THE SOMALI DEM. REPUBLIC

## QAYBTA LABAAD

Xeer Madaxweynaha J.D.S. L. 10 ee 1da Jennaayo 78, Kirada Cusub ee Baabuurta Xamuulka.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

HADDUU ARKAY : Xeerarkii tr. ahayd 240 iyo 89, taariikh. 29.9.70 iyo 1.6.1967 ee ku saabsanaa Sonkorta iyo qalabka kala duwan.

HADDUU ARKAY : Xeerka Madaxweynaha J.D.S. ee ku saabsan Kirada Cusub ee Baabuurta Xamuulka: L. 47 ee 8 Maajo 1974.

HADDUU KA WARHELAY : Dhibaatooyinka Gaadiidka ka haysta xagga qiimaha kacaya muddadii xeerkii hore ee xaddidaayey qiimaha kirada baabuurta ;

ISAGOO HIRGELLINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. iyo Golaha Wasiirrada.

WUXUU XEERAYAA :

Qodobka 1aad

In kirada baabuurka tankiisu ka badan yahay 10ka tan ee xamuulka kala duwan qaada (General Cargo) marka uu marayo waddada aan laami ahayn (waddo xun) ay noqoto 30 santi tan Km. kiiba, marka uu waddo laamiya marayana ay noqoto 25 santi-tan-Km.kii.

Qodobka 2aad

Waddada qaybina xuntahay, qaybina laami ay tahay, waddo xun oo aan laami ahayn ayaa loo xisaabi doonaa, haddii qaybta laamiga ahi ay gaadho ama ka yar tahay saddex daloolkiiba dalool. Haddiise saddex daloolkiiba dalool ay ka baan tahay laamigu, qaybta laamiga ahna waxa lagu qaadi doonaa 25 santi, qaybta xunna waxa lagu qaadi doonaa 30 santi-tan-Km. kiiba..

Qodobka 3aad

Baabuurta 10 tankeedu tahay 6-10 ee xammuulka kala duwan qaada kiradoodu waxay noqondoontaa 30 santi-tan-Km. kiiba wadda kastooy maraanba.

Qodobka 4aad

Jidadka dhibaatadoodu xad-dhaafka tahay, haddii ay lagama maarmaan noqoto, waxa go'aan gaar ah ka gaari kara Wasaaradda Gaadiidka, kaddib markay Hay'adda arrintu khusaysaa soo gorto

Qodobka 5aad

Baabuurta la kiraysto ee madhnaanta loogu diro meesha xamuulku taal, meeshaasoo ka baxsan xadka magaalada ama tuulada laga diraayo, kharajka saliidda lagu gaadhayo halka kiradu taal waxa bixin doona cidda baabuurka kiraysanaaya.

Qodobka 6aad

Baabuurta ay u baahdaan Shariikadaha qalaad ee dalka Soomaali-yeed ka shaqeysa (Shariikadaha Macdanta, Jidadka, Gegooyinka Diyaa-radaha iyo Dekedaha) kirada ay wax ku qaadanayaan waxa laga gaari karaa go'aan khaas ah.

Wasaaradda Gaadiidka waxay awood u leedahay in ay kolba amar gaar ah ka soo saarto oo xaddidaayo kirada Baabuurta qodobkan ku tilmaaman.

Qodobka 7aad

Wixii Xeer ah ee la soconnin ama ka horimanaya Xeerkan baa la-gu baaba'shay.

Qodobka 7aad

Xeerkani wuxuu hirgalayaa 1.1.1978.

Muqdisho, 1 Jen. 1978.

WASIIRKA GAADIIDKA

(Maxamed Buraale Ismaaciil)

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER Madaxweynaha JDS. L. 11 ee 24 Febraayo 1978, Magacaabid La-taliyaha Madaxweynaha xagga Dhaqaalaha.

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah 1. 17. 18 iyo 19 ee 1da Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lagu dhisay jagada La-Taliyaha Madaxweynaha xagga Dhaqaalaha lamb. 71 ee 13 Nofember 1977;

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aankii Golaha Dhexe XHKS uu ku gaaray Shirkiisii aan caadi ahayn ee 27.10.77.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

In Jaalle Cabdiraxmaan Nuur Xirsi loo magacaabay La-Taliyaha Madaxweynaha xagga Dhaqaalaha.

Qodobka 2aad

La-Taliyaha Madaxweynaha ee Dhaqaalaha wuxuu yeelan doonaa Gunno iyo Xuquuq la mid ah kan ay qaataan Guddoomiyayaasha Hoggaanka XHKS.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa ka billaabata 2.2.78. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 24 Feb. 1978.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

**Jaalle Maxamed Siyaad Barre**

**Waan aragnay ee Diiwaangelinay**
**Diiwaanka lam. 2 bogga 220**
**ku sime Hantidhawrka guud**

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee L. 12 ee 15 Abriile 69.
Concessione di area di terreno demaniale a favore del Sig Ali Scek Haider.

MINISTROLAVORI PUBBLICI

DIPARTIMENTO FONDIARIO E DEL DEMANIO

VISTI gli articoli n. 77 e n.. 83, secondo comma della Costituzione:

VISTO il D.L. 7 Febbraio 1965, n. 1, «modificazione alla Legge 3 Giugno 1962, n.14» relativa all'Ordinamento del Governo;

VISTO il D.P.R. 23 Maggio 1961, n.144;

VISTO l'Ordinanza n.5 del 12 Apprile 1950;

VISTO la domanda in data 24.12.1961, presentata dal Sig. Ali Scek Haidar, intese ad ottenece in concessione a scopo edilizio di terreno demaniale sito in Mogadiscio — in via 2 Dicembre, Ricade nella zona V. Periferica;

CONSIDERATO che, l'avviso ad opponendum riguardante l''area terreno richiesta e' rimasto affisso a termini di legge all'albo del Municipio di Mugadiscio, ed e' stato pubblicato sul Bollettino Ufficiale della Somalia Suppl.n.2 al n. 8 del 11 Agoosto 1962, senza opposizione da parte di terzi;

VISTO il progetto concernente la costruzione di un edificio in muratura che stato approvato dalla Commissione Edilizia di Mogadiscio nella sua 297. seduta del 15.10.1962;

VISTO la Bolletta n. 9820 in data 20 Nov. 1962. dell'Ufficio sugli Affari attestante che il Sig. Ali Scek Haider ha pagato la somma di Sh. So. 384, — quale prezzo di cessione dell'area di terreno richiesta in concessione a scopo edilizio;

CONSIDERATO Che, l'area di terreno richiesta di mq. 192. — e' stata consegnata al Sig. Ali Scek Haider, come si rileva dal verbale redatto dal Servizio Tecnico Erariale in data 20.11.1962;

VISTO il disciplinare di concessione edilizia e la planimetrica che lo integra ;

D E C R E T A

E' concesso a scopo edilizio al Sig. Ali Scek Haidar l'area di terreno demaniale di mq. 192, — sito in Mogadiscio — in via 2 Dicembre, di cui alla planimetria allegata e alle condizioni contemplata in data 3 Apr. 1969, fra il Governo rappresentato dal Ministro dei LL.PP. e l'interessato Sig. Ali Scek Haider.

Mogadiscio, li 15 Apr. 1969.

IL MINISTRO
F.to : On.le Ali Aliò Mohamed

VISTO E REGISTRATO
Reg. n. 1 foglio n. 34
Mogadiscio, li' 17 MAY 1969
IL MAGISTRATO AI CONTI

Xeer Wasaaradda H. Guud L. 13 ee 16 Luulyo 77 qaadid dhul dan guud awgeed ee waqti hore la siiyeye Jaalle Bilan Samatar Warfaa.

WASIIRKA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ISAGOO ARKAY : Warqaddii koowaad, labaad iyo tan sedexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 soo baxday 1 Luuliyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxday 13kii Settembar 1973;

ISAGOO ARKAY : Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 2.040/= loona tiriyey Bilan Samatar Warfaa sida ka muuqato xaashida ay qoratay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhduna ahayd 12/3/61.

ISAGOO ARKAY : Warqadda lamb. yahay 1665/6/74 taariikhdeeduna ahayd 26/9/1974 ee ay noo soo qortay Wasaaradda Dalxiisku iyadoo ku weydiisaneysa in loo qiimeeyo derbiga ay leedahay Jaallaha kor ku magacaaban;

ISAGOO ARKAY : Warqadda qiimaynta derbiga ee ay soo sameeyeen Guddi loo xilsaaray kana kooban:-
Maamulaha Farsamada dhulka Inj. Cabdirashiid Ismaaciil, Jeom. Maxamed Xuseen iyo Jeo. Aadan Xaashi Nuur taasoo muujinayso qiimaha derbiga in uu yahay lacag dhan Sh. So. 35.992,80/= (Soddon iyo Shan kun Sagaal boqol sagaashan iyo laba iyo 80/= Senti eeg qiimaynta halkaan ku lifaaqan;

XEER

Waxaa la cadeeynayaa in loo Qaaday Dan Guud awgeed derbi ay leedahay Jaalle Bilan Samatar Warfaa, iyadoo loo celinayo magdhow gaaraya Sh. So. 35.992,80/= (Soddon iyo shan kun sagaal boqol sashan iyo laba iyo 80/ Senti). Sida ka muuqato qiimaynta rasmiga ah oo kor ku tilmaaman:

Isla markaas waxaa la caddeynayaa in qiimahaas uu-san ku jirin kan dhulka.

Lacagta kor ku qoran waxaa laga bixinaayaa Miisaaniyadda Wakaaladda Dalxiisku;

Muqdisho, 16 Lug. 1977.-

WASIIRKA WASAARADDA HAWLAHA GUUD
INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR

WASIIRKA MADAXTOOYADA
Waan aragnay ee Diiwaangelnnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 30
Muqdisho, 19 Lug. 1977.
Ku Xigeenka Hantidhowrka Guud.

Xeer W. Hawlaha Guud L. 14 ee 15 Feb. 78, Dhul Dowladeed la siiyey sharci ahaan loo aqoonsaday (Libera Disponibilità) Jaalle MAXAMED NUUREENI BAKAR - kuna fadhiya mq. 697,50.

## W A S I I R K A

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ISAGOO ARKAY : Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 soo baxday 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxday 13kii Sebtembar 1973;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 144 soona baxday 23kii Maajo 1961-kii;

ISAGOO ARKAY : Xeer Dowladeed lamb. 83 Rep. taariikhda markay ahayd 19 Oktoobar 1967 laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. lamb. 1, R.6 taas oo lagu siiyey Jaalle CABDULLAAHI MAXAMUUD iyo FAARAX SUGULLE SAMATAR cad dhul ah ay ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiya mq. 2.700/= kuna yaal Muqdisho — Degmada Hodan;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 9641 taas oo beddeshay middii hore lamarkeedu ahaa 21972 laguna aqoonsaday fadhigii 2aad ee Guddiga dhismaha Dowladda Hoose kana ahaa Guddoomiye CUSMAAN MAXAMED JEELLE taariikh. Markay ahayd 26/1/1971 kuna saabsan dhismo Guri, kuna fadhiya mq. 697.50;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijintii farsamada, INJ. MAXAMED CABDI WARFAA kana tirsan waaxda Farsamada dhulka ee W.H.G. taariikhdeedu ahayd 1/2/1975, taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Gudiga dhismaha Dowladda Hoose ee Xamar lamb. yahay 21972 ee 26/1/1971 laguna xaqiijiyey sida ay naqashaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada Guriga ku dhisan Xamar, Degmada Hodan laguna siiyey warqadda lamb. 4704 ee 14 Dic. 1974 Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGOO ARKAY : Qoraal (ATTO) lamb. 345 Reb. taariikh. 30/1/1965, lagu diiwaan geliyey Xamar 1-2-1965 al n. 77 Atti Publici Vol. 16 oo ah caddeynta Notaayada Cabdalla Xaaji Faarax taas oo Cabdullaahi Maxamuud Xasan iyo Faarax Sugulle ka gad-

ISAGOO ARKAY : Qoraal (Atto lamb. 9208 Reb. taariikh. 25/7/1967, lagu diiwaan geliyey Xamar, ee 29-7-1967 al n. 530 Atti Publici Vol. 18, oo ah caddeynta Notaayada Micheal Joheph Mariano taas oo Axmed Jaamac Cabdulle ka gaday kuna wareejiyey Maxamed Nurreeni Baker wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismaha ku yaala cadka dhulka oo ku fadhiya mq. 697. 50/= kuna yaal Muqdisho — Degmada Hodan;

ISAGOO AQOONSAN : In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsan siismaha iyo gocan u gelinta dhismahaas ku yaal cadka dhulka Dowladda (Concessione libera disponbilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, wuxuu soo saarayaa.

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday Maxamed Nureeni Baker, dhul ku fadhiya mq. 697,50= kuna yaal Muqdisho — Degmada Hodan.-

Soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran.

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo.

Koofur waxaa ka xiga Maxamed Muuse.

Galbeed waxaa ka xiga Waddo.

Bari waxaa ka xiga Maxamed Ciise.

Muqdisho, 15 Feb. 1978.

WASIIRKA W. H. GUUUD

Inj. Maxamed X. Madar

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb.5.

Muqdisho, 21 Feb. 1978.

Ku xigeenka Hantidhowrka Guud

Sax. Yuusuf Cali Nuur.

## QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9.9.65 n. 2; lumidda Buugga kaydka ee lam yahay 10496 kuna tahay Sh. S0. 3.683

Bankiga Ganacsiga Laanta Koowaad ee Xamar.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Buugga kaydka. kaddib ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Ciise Faarax Maxamed. ama qof isla ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho 13 2 78.

Guddoomiyaha Maxkamadda Bob. Banaadir
Dr. Cabdullaahi Daahir Barre.

L. 100

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9.9.65 n,2; lumidda Jeegagga kaydka ee kala yihiin 010690 iyo 01691 oo ay ku qoran tahay kiiba 1.000 isu geyn 2.000 oo laga leeyahay Bankiga kaydka laanta afraad.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeegagga kaydka kaddib markii ay ka soo wareegta 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegagga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Maxamed Abyan Cigaal. ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah ayadoo la sugaayo mudda 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay

muqdisho, 26.2.78.

Guddoomiyahay Maxkamadda G. Banaadir

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: qod 69 D.L. 9.9.65 n. 2; lumidda Jeegga kaydka ee lambarkiisu yahay 211318, ay ku qoran tahay 3,000 kana soo baxay Bankiga Ganacsiga Laanta 4aad ee Hodan.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegga wareega kaddib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegagga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Cabdullaahi Maxamuud Guuleed ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah ayadoo la sugaayo muddada 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 26.2.78

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob Banaadir
Dr. Cabdullaahi Daahir Barre.

L. 102

MAXKAMADDA GOBOLKA BAYDHABO

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BAY

HADDUU ARKAY: dacwadda uu keenay Jaalle Xaaji Siid Bakar

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiinta Bankiga;

HADDUU ARKAY: Qodobka 69 D.L. 9.9.65 n. 2 Lumidda Jeegga lam. yahay 17352 oo ay ku jirto lacag dhan 540 Sh. So.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegga lamb. kor lagu soo sheegay kaddib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood laga billaabo maalintii Dekereetada la Sharciyeeyo laguna sharciyeeyo faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Xaaji Siid Bakar Shariif Cusmaan ama qof isla asaga ka sita wakaalad Sharci ah iyadoo la sugayo muddada 30 maalmood.

Baydhabo 27.2.78

Guddoomiyaha Max Gobolka Bay
(Dr. Maxamuud Xasan Mire)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9.9.65 n.2; lumidda Buugga kaydka ee lam. yahay 6547 iyo lacagta ku qoran oo dhan 490 oo laga leeyahay Bankiga Ganacsiga kaydka Laanta koowaad.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Buugga kaydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Maxamed Cabdulle Cali ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci haydoo la sugayo muddo 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 1.3.78.

Guddoomiyha M. Gobolka Banaadir

Dr. Cabdullaahi Daahir Barre

L. 104

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE — S.I.P.A.
Saldhigga Shalambood - Ra'sumaal Sh. So. 8.112.000

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH.

Sahmi qabayaasha Sharikadda Società Incremento Produzioni Agricole (S.I.P.A) - waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Muqdisho - Xafiiska Rag. Arturo Salvi, maalinta 18ka Maarso 1978, saacaddu markay tahay 9ka subaxnimo fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura geliwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 19ka Maarso 1978 isla saacadda kor ku xusan, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda :

BARNAAMIJKA SHIRKA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;

2) Hor dhig Miisaaniyadda iyo Kharajka & Dakhliga ilaa 31da Diseembar 1977 iyo go'aannada la xiriira ;

3) Wax alla waxii falanqays u baahdo.

Waxaa xaq u leh in ay shirka ka soo qayb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buugga Shariikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 105

---

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE - (S.I.P.A.)
Società per Azioni - Sede Sociale in Scialambot
Capitale Sociale versato Sh. So. 8.112.000

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

I Signori Azionisti delle Società Incremento Produzioni Agricole - (S.I.P.A.) - S.p.A., sono convocati in Assemblea Ordinaria, in Mogadiscio presso lo Studio Commerciale Rag. Arturo Salvi per il giorno 18 Marzo 1978 ore 9 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 19 Marzo 1978 alla stessa ora e nello stesso luogo, per discutere e deliberare sul seguente :

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale ;

2) Presentazione Bilancio e conto Perdito & Profitti chiusi al 31 dicembre 1977 e deliberazioni relative ;

3) Varie eventuali.

Avranno diritto di intervenire all'Assemblea gli Azionisti inescritti nel libro Soci almeno cinpue giorni prima di puello fissato per l'Assemblea.

Il Consiglio di Amministrazione

S. I. C. A. F. B O E R O S.P.A.

SOCIETA' INDUSTRIALE COMMERCIALE ARMATORIALE

SALDHIGGA: MUQDISHO - RA'ASUMAAL Sh. So. 2.200.000

OGEYSIIS ISUGU YEERID SHIR CAADI AH

---

Sahmiileyda ee Shirkadda (S.I.C.A.) Francesco Boero e Figlio S.P.A. oo saldhiggeedu yahay Muqdisho, waxaa la isugu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono magaalada (Itaaliya), Jidka Via Brenta 2, maalinta 20.4.1978 saacaddu markii ay tahay 10ka subaxnimo, fadhiga ugu horreeyey, haddii suuro geliweyso waxaa mar labaad la isugu imaan doonaa maalinta 24.4.1978 isla meesha iyo isla saacadda kor ku qoran si looga helo go'aanna laga gaaro arrimaha soo socda:

1. — Miisaaniyadda ku saabsan sannadkii 1977;

2. — Wax alla wixii kale oo yimaada.

pp. S.I.C.A. F.Boero

L. 106

S.I.C.A. — F. BOERO S.P.A.

Societa' Industriale Commerciale Armatoriale Sede in Mogadiscio Capitale Sh. SO. 2.200.000.00

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Sociata' Industriale Commerciale Armatoriale — Francesco Boero and Figlio — Sede in Mogadiscio sono convocati in Assemblea Ordinaria in Roma (Italia) Via Brenta 2, in prima convocazione per il giorno 20 Aprile 1978 alle ore 10,00 a.m. ed occorrendo in seconda convocazione alla stessa ore e nello stesso luogo per li giorno 24 Aprile 1978. per discutere e deliberare sul seguente;

ORDINE DEL GIORNO

1. Discussione ed approvazione del Bilancio 1977;

2. Vari ed eventuali

L'AMMINISTRATORE UNICO
S. I. C. A.

# MAXKAMADDA DEGMADA BERBERA

MARKAAN ARKAY : Weydiinta Ibraahim Cabdi Camale.
MARKAAN ARKAY : Caddeynta Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka;
MARKAAN ARKAY : Qodobka 69 D.L. 9.9. 65 L. 2;

Waxaa cad lumista Buugga Kaydka ee L. Yahay 1391/7, kuna qoran tahay Shs. 10.45.

Waxaan amrayaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad Buugga aan kor ku soo sheegay muddo 30 (soddon beri) oo ka bilaabato markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga an haddaan la helin cid sheegata waana in gacanta laga saaro ninka magaciisu kor ku qoran yahay ama qof ka sita awood ama wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo 30 beri.

Berbera, 31.1.78

Guddoomiyaha Max Deg. Berbera
(Shawqi Cilmi Cali)

L. 107